QAADASHADA DHALASHADDA MAREYKANKA

BECOMING A U.S. CITIZEN

Markaad noqotid qof dhalashadda Mareykanka qaata waxaad heleysaa waxaan soo socda:

- Xaq u yeelatid inaad codkaaga dhiibatid.
- Waxaad waddanka uga bixi kartaa kuna soo laaban kartaa si sahlan.
- Waxaad caadiyan ku caawin kartaa xubanaha qoyskaaga iney Mareeykanka ku noolaadaan si deg deg ah.
- Caruurtaada ka yar 18 sano si toos ah ayey u qaadanayaa dhalashadda Mareeykanka.
- Waddanka lagaama masaafurin karo. Kuwa aan dhalashadda haysan ee dembi gala badanaaba waa la musaafurin karaa.
- Waxaad shaqoyin ka dalban kartaa dawladda federaaliga.
- Xuquuq ka fiican si aad ku heshid barnaamijyada cayrta sida MFIP iyo SSI.
- Waxaad heli kartaa baasaboor mareeykan ah.
- Waxaad inta badan ka heli kartaa adeega rukunka ka wanaagsan markaad booqaneeysid safaaradaha mareeykanka.

MA WAXBAA IGA GO'AYA HADDAN QAATO DHALASHADDA?

Waxaad ballanqaadaysa inaad ka noqotid waddaniyadda dhulkaagi hooyo. Tani waxey wax ka baddeli kartaa xaquuqda aad ku lahaan jirtay waddankaagii hooyo. Bal eeg sida noqonayaan shuruudaha waddankaagii hooyo. Waddankaagi waxaa laga yabaa iney kaa lumaan:

- Dhalashaddaadi
- Xaqii aad u lahayd inaad codkaaga dhiibatid
- Xaqii aad u lahayd inadd hanti ku yeelatid

Kuwan weey is bedeli karaan:

- Xaqa aad u leedahay heysashada caruurtaada.
- Xaqa aad u leedahay inaad geshid dalkaad u dhalatay.
- Waxaad u baahraan kartaa ogolaansho aad ugu shaqeeysato dalkaad u dhalatay ka dib markaad qaadatid dhalashada Mareeykanka.

YAA QAADAN KARA DHALASHADDA MAREYKANKA?

Waa inaad ahaataa:

- Qof ugu yaraan jira 18 sano haddii aad adi ahaan buuxsaneeysid.
- Kaarka degenaanshaha haysatay muddo dhan 5 sano. **3** sano keliya haddaad qabtid qof ugu yaraan 3 sano dhalashadda haystay.
- Add isla gobolka ku nooleyd wax badan 3 bilood
- Tahay qof sharaf leh oo asturan
- Ku dhaaratid inaad daacad u tahay dawladda Mareykanka

Aqrisid, qortid kuna hadashid luqadda ingiriisiga aqoonna u leedahay taariqda iyo dawladda Mareykanka. Waxaa laga yaaba in laga daayo imtixaamka ingiriisiga iyo kan taariiqda-hoos eeg.

UBADKEYGA DHALASHADDA MA QAADAN DOONAAN?

Ubadka ka yar 18 sano waxay si toosan dhalashadda u qaadan karaan marka uu hal waalid dhalashadda qaato haddii:

- 1 waalid uu qaato dhalashadda inta uusan cunuga gaarin 18 sano IYO
- Cunuga uu haysto kaarka degenaanshaha IYO
- Cunuga uu la degganayahay waalid dhalashadda haysta IYO
- Cunuga weli ma guursan marka uu waalidka dhalashadda qaadanayey.

Hadii aad heysato cadeynta saxda ah ee waxyaabahan cunnuga waxuu helayaa shahaadada dhalshada ama baasaboor Mareykanka.

SIDEEBAAD ISUGU DIYAARISAA IMTIXAAMKA?

Xitaa haddaadan afka ingiriisiga aqoon u lahayn, marna ha samrin. Qaado fasallada ingiriisiga laga barto. Fasallada badankooda waa bilaash. Si aad ku heshid fasallada ingiriisiga ee kuu dhow wac:

Guddiga Barashada ee Minnesota 1-(800) 222-1990

The Minnesota Literacy Council at 1-(800) 222-1990 ama aad bogga internet-ka www.themlc.org.

MA WAXA LAYGA RABAA INAAN INGIRIISIGA BARTO?

Looma baahna inaad ingirisi taqaanid haddaad tahay:

- Qof jira 55 sano ama ka weyn aadna kaarka degenaanshaha haysatay 15 sanoo la soo dhaafay, ama
- Qof jira 50 sano ama ka weyn aadna kaarka degenaanshaha haysatay 20 sanoo la soo dhaafay.

Laakiin laba goorba waxaa lagaa rabaa inaad ku guuleysatid aqoonta taariiqda Mareykanka, laakiin waxaad ku qaadanysaa afkaaga hooyo.

Haddaad tahay qof jira 65 sano kaarka degenaanshaha haysatay 20 sano, waxaad qaadan kartaa imtixaam taariiq ah oo fudud, waxaadna wareysiga dhalashadda ku qaadaneysa afkaaga hooyo.

MAXAA DHACAYA HADDAAN BARAN KARIN AF INGRIIS?

Haddaadan luqadda ingiriisiga baran karin, tariiqda ama dawladda sababo la xiriira caafimadka maskaxda ama dhibatooyin jirka sida dhibaatoyin xagga xusuusta ama madluunnimada, waxaad codsan kartaa in lagaa “dhaafo”. “Dhaafidda” macneheeda waxay tahay in lagaa daayo wareysiga dhinaca luqadda ingiriisiga uma baahnid inaad imtixaamka qaadatid.

Dhaqtarkaaga ha buuxiyo foomka INS ee N-648. Wac 1-(800)-870-3676 si aad foomka ku heshid. Waxaad kale oo aad ka heli kartaa bogga internet-ka www.uscis.gov kadibna garaac foomka. Haddey ku hayaan dhibaatoyin xagga maskaxda, foomka *waa inuu soo buxiyaa* dhaqtar kaasoo noqon kara dhaqtarka cilmu nafsiga ama dhaqtarka maskaxda. Weydii dhaqtarkaaga inta aadan foomka u geynin inuu caymiska uu bixinayo biilkaan. Si tafatiran dhaqtarka u weydii waxa ay tahay dhibaatada ku haysa iyo sida ay kaaga hortaagantahay inaad imtixaamka qaadatid.

MA LACAG BAA SI AAN DHALASHADDA KU QAATO?

Haa. Qiimaha waa $675. Haddaadan qiimaha bixin karin kala hadal qareen ama qof sharciga aqoon u leh. Haddaad qaadatid gargaarrada sida MFIP ama SSI, markaasi waxaad weydin kartaa imigreeshanka iney ujrada kaa daayaan marka aad wax dalbaneysid.

QAREEN MIYAAN LA HADLA INTA AANAN WAX DALBAN?

Xaaladaha qaarkood, waa inaad la hadashid. Qareenku wuxuu kaala talin karaa sida wax loo dalbado iyo sida foomanka loo buxiyo. Qareen la hadal haddaad:

- Aad Mareykanka dibaddiisa ku nooleyd in ka badan 6 bilood tan iyo marka aad halkaan timid.
- Ay jiraan dhibatoyin la xiriira qamri iyo maandooriye, ay kamid yihiin Khat iyo mandooriyeyaal la mamnuucay.
- Lagugu eedeyey laguguna caddeeyey inaad xaas xadgudub ku sameysay.
- Aadan bixin masruufka ubadka awa canshuur laguugu leeyahay.
- Lagu soo xiray ama dembi laguugu eedeyey. (Waa lagu musaafurin karaa)
- Aadan bixinin canshuurta.
- Xaas ayaad lahayd marka aad Mareykanka soo gashay, laakiin aad foomkaaga codsiga aad ku buuxisay “qaxooti caruur ah oon weli guursan”.
- Aadan daacad u noqon waaxda Socdaallada waqti la soo dhaafay.
- Aadan iska diwaangelin ciidameynta amaba aad ciidanka ka tirsaneyd kaddibna aad isaga carartey.
- Aad ka tirsaneyd xisbiga Shuuciga.
- Aad ka tirsaneyd kooxaha cunsuriyada, ama rabey iney afgemibiyaan dawladda Mareykanka.
- Aad wax su’aal ka qabtid isbeddello ku dhacay noloshaada oo shaqa ku yeelanaya xaaladda sharciga waddanka.

Foomanka iyo wareysigaba waad inaad runta ku sheegtaa. Haddii 10 sano kahor laguu xiray inaad mar wax ka xadday dukaan kaama reebeyso inaad dhalashadda qaadatid laakiin haddaad ka beensheegtid waa kaa reebeysaa.

Caawinaad waxaad wacdaa:
Cawimaad haddaad rabtid ka wac Legal Aid Society’s Immigration Law Project at (612) 332-1441 ama The Immigrant Law Center at (651) 291-0110.

Si aad u hesho Waxyaabo kale oo Legal Aid Society ah, oo eey ku jiraan warqaddaha xaqiiqda ee lagu sheegay dukumiintgan, aad www.lawhelpmn.org/LASMfactsheets.

Minneapolis Legal Aid – CLE
MN Legal Services Coalition
2324 University Avenue, Suite 101B
St. Paul, MN 55114

Ha isticmaalin warqadaan xogta haddii ay ka weyn tahay hal sanno.
Noo soo qor marka aad dooneysid waraaqaha casriyeysan, liiska warqadda xogta, ama qaababka kale. Waraaqaha Xogta ma u aha jawaab dhameystiran arrimaha sharcigai. U tak qareen si aad u heshid la-talin

© 2010 Mid-Minnesota Legal Assistance. Dukumeentigan dib baa loo soo saran karaa, loo isticmaali karaa shaqsiyan si ganacsi la’aah ah ama si ujeedo waxbarasho ah kaliya. Xaquuqaha kale waa la reebtay. Ogeeysiiskan waa inuu ku yaal koobiyada oo dhan. Dib-u-daabac, qaybin, iyo u isticmaal ujeedo ganacsi waa ka mamnuuc.